

UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **13/02/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iyyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXISO:- HAWO MOHAMED SAID, Hooyo Faadumo Axmed Cali, Somali ah, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 05-06-1957, Sita: Somali Passport, Lr. P00786332	LA WAKIISHE:- SAHRO MOHAMED SAID, Hooyo Mako Yuusuf Maxamed, Somali ah, Ku Dhalatay: dhuusamareeb, Sanadkii: 01-01-1983, Degan Ceelasha biyaha, Sita: Somali Passport, Lr. P01482172
TILMAAMAHA NUS BOOSKA Nus boos Banaan oo Ku yaal: Muqdisho , Degmada: (Afgooye, Gaar ahaan nawaaxiga Ceelasha biyaha ee km17) , Cabirka: (10X20-Mt)-M , Loto No: 043 , W.M.L: (Rep.n 4440/2016) , Tr. 09/05/2016 , Kana Soo Baxay Xafiiska Nootaayaha Afgooye, Uuna Saxiixay Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil)	SOOHDINTA NUS BOOSKA Bari: dhul dad, Koonfur: Jid , Galbeed: dhul dad, Waqooyi: dhul dad

B- Aniga oo ah **HAWO MOHAMED SAID**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Walaashey **SAHRO MOHAMED SAID** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Nus booska Tilmaamihisu Sare Ku Xusan yihiin, in Nus booskaas ay gadi karto, Wareejin karto, Hibeyn karto, dhisi karto, ijaari karto, u dacwoon karto, qareen u qaban karto, uguna doodi karto Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **SAHRO MOHAMED SAID** awoodaas aan siiyay ay u madax banaan tahay oo aniga Nus booskaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **SAHRO MOHAMED SAID**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiiyey Walaashey **HAWO MOHAMED SAID**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA

HAWO MOHAMED SAID

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

SAHRO MOHAMED SAID

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- MOHAMED ABDI MOHAMUD

2- ABDULLAHI ABDIRAHMAN ADEN

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1397/T.P.N/25, Tr. 13/02/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- HAWO MOHAMED SAID** Ahna (Wakaalad Bixiye), **2- SAHRO MOHAMED SAID** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

By: Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"



NOOTAAYAHA
Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"



MASAWIRKA LA WAKIISHAHA

SAHRO MOHAMED SAID



[Handwritten signature in blue ink]





JAMHUURIYADDA FEDERAALIGA SOOMAALIYA

XAFIISKA NOOTAAYAHA AFGOOYE

UJEEDDO: CADDAYN KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANNAAN

Rep.n 4440/2016

Afgooye, maanta oo taariikhdu tahay 09/05/2016, anigoo ah Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Bill), ahna Nootaayo Afgooye, xafiisna ku leh Ceelasha Biyaha, waxaa ii yimid iyagoo heshiis ah, xiskooduna taam yahay, cidina aysan qasbin dadka magacyadoodu hoos ku qoran yihiin, kuwaasoo iga codsaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadasho dhul bannaan, dadkaasina waxay kala yihiin:=====

- 1) Mudane **Nuur Maxamed Cali**, ahna 36 sano jir, hooyadiisna la yiraahdo Xaawo Maxamuud Cali, ahna Soomaali, kuna dhashay Degmada Cadaado, masawirkiisuna warqaddaan ku dheggaan yahay, ahna laga iibsadaha dhulka, kaasoo dammiinu aqoonsi uu ka yahay Mudane **Cabdirisaaq Maxamed Macallim**, lehna Baasaboorka Soomaaliya ee lambarkiisu yahay **P00207893**,=====
- 2) Marwo **Xaawo Maxamed Siciid Cabdi**, ahna 55 sano jir, hooyadeedna la yiraahdo Faadumo Axmed Cali, ahna Soomaali, kuna dhalatay Magaalada Dhuusamareeb, ahna iibsadaha dhulka.== Dadkaas dhulka kala iibsaday anigoo Nootaayo ahi markaas dhegeystay iyaga iyo markhaatiyaasha la socda, waxaan go'aansaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadashada dhul bannaan. Mudane Nuur Maxamed Cali wuxuu Marwo Xaawo Maxamed Siciid Cabdi ka iibiyey dhulkiisa ah **10x20**, lana mid ah **200MQ**, kuna qoran lambarka: **043**, kuna yaalla Degmada Afgooye, gaar ahaan nawaaxiga Ceelasha Biyaha ee km 17 Muqdisho-Afgooye, wuxuuna kaga iibiyey dhulkaas lacag dhan **USD 3,250** (Seddax kun, labo boqol iyo konton doollar) oo israac ah, lacagtaasoo la wada bixiyey, gacantana laga wada saaray laga iibsadaha dhulka, iyadoo aysan waxba ka maqnayn. Dhulkaas wuxuu Mudane Nuur Maxamed Cali ku yeeshay qoraalka lambarkiisu yahay **115297/2011**, taariikhdiisuna tahay **05/01/2011** ee uu qoray Nootaayo **Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Bill)**. Dhulkaas waxay sohdimihiiisu yihiin sidatan: **Koonfur** waxaa ka xiga jid, dhinacyada kalena waxaa ka xiga dhulal dadeed, iibsadaduna waxay caddaynaysaa inay soo aragtay dhulkaas, fiiri gaar ahna u soo yeelatay, inay la wareegtana ay diyaar u tahay. Sidaas daraaddeed, wuxuu laga iibsadaha dhulku qoraalkaan ku caddaynayaa inuu masuul ka noqon doono wixii caabaal ah ee ka yimaada dhulkaas milkiyaddiisa, heshiiskana sidaas ayaa lagu dhammeeyey, markaas kaddib anigoo Nootaayo ahi waxaan qoray warqaddaan, una akhriyey labada dhinac ee dhulka kala iibsaday iyo markhaatiyaasha la socda, inta ku qoran oo dhan ayeyna isku raaceen, islana oggolaadeen, kaddibna halkaan hoose ayey wada saxiixeen.=====

SAXIIXA LABADA DHINAC

1) Mudane Nuur Maxamed Cali

(libiye) _____

2) Marwo Xaawo Maxamed Siciid Cabdi

(libsato) _____

SAXIIXA DAMMIINU AQOONSIGA

1) Mudane Cabdirisaaq Maxamed Macallim

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1) Mudane Maxamed Xasan Mahad

2) Cabdullaahi Xuseen Xirsi

SAXIIXYO LA SUGAY

Anigoo ah Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Bill), ahna Nootaayo Afgooye, waxaan qoraalkaan ku caddaynayaa in 5ta qof ee kor ku qoran ay saxiixyada ku hor qorani yihiin kuwoodii runta ahsa, dadkaasoo kala deggan Muqdisho iyo Afgooye, ahna Soomaali, kuwaasoo qoraalkaan wadajir hortayda ugu saxiixay kaddib markaas u akhriyey, kuna qanceen.=====

NOOTAAYO

Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Bill)



MC/MC

Sahyo = 0617841548

Aamina = 0722215139




FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 13/03/2025

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Sahro Maxamed Saciid** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1397/T.P.N/25, Tr. 13/02/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	Sahro Maxamed Saciid
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	20X10-Mt
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Afgooye, Gaar ahaan nawaaxiga Ceelasha biyaha ee km17
Lotto Lambar	043
W.M.L	Rep.n 4440/2016, Tr. 09/05/2016 Ka soo baxday Xafiiska Nootaayaha Afgooye
Taariikhda Wakaalada	13/02/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **Sahro Maxamed Saciid**, Leh Tel No. **0617841548**, Degan **Ceelasha biyaha** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Sahro Maxamed Saciid

Sahro